EXPANDING ACCESS TO JUSTICE

Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada
Taxanaha Daraasadda Aqoonyahannada EAJ

Tirsiga 2
Juulaay 2020

DADKA NUGUL, GAAR AHAAN CARRUURTA

Cabdillaahi Maxamed Warsame

USAID KA TIMID DADWAYNAHA MARAYKANKA
BALAADHINTA ADEEGYADA MARIN-UHELIDA CADAALADA
pact building local promise.
ABA AMERICAN BAR ASSOCIATION Rule of Law Initiative

Ku saabsan:

Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada (EAJ) Taxanaha Cilmi Baadhista waxay dhiirigelisaa isweydaarsiga fikradaha ku saabsan caddaaladda gudaha Soomaaliya waxayna faafiyaan natiijooyinka baaritaanka. Qorayaashu waa aqoonyahanno gaar ah oo ka kala socda Somaliland, Puntland, iyo Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.

Afeef:

Warbixintaan waxaa lagu soo saaray taageero laga helay Dadka Mareykanka iyada oo loo sii marinayo Hayada Mareykanka ee Horumarinta Caalamiga (USAID) oo hoos timaad Nidaamka Taageerada Xuquuqda Aadanaha (HRSM). HRSM waa hay›ad ay maalgaliso hay›adda USAID, waana hoggaamiye shan sano ah oo ay weheliyaan heshiis iskaashi oo ay fulinayaan hay›adda ‹Freedom House› ee uu hoggaamiyo «Badbaadinta Xuquuqda Caalamiga ah iyada oo loo marayo Isku-xirka Joogtada ah» (PROGRESS). Waxyaabaha ku jira ayaa mas›uul ka ah Heshiiska mana ahan inay ka turjumaan aragtida USAID ama Dowladda Mareykanka.

Lagala xiriiri:

Anton Pestana
EAJ Madaxa Hawlgalka qeybta
Pact Kenya
Nayroobi, Kenya
+254-712-232-200
apestana@pactworld.org

Nayroobi, Juulaay 2020

Tusmada

1. HORDHAC IYO TAARIIKH.....4
   1.1. UJEEDKA LAGA LEEYAHAY XOGTAN 4
2. HABKA CILMI-BAARISTA.....4
3. NATIIJOOYINKA IYO FALANQAYNTA.....5
4. GUNAANAD IYO TALOOYIN.....15
5. LIFAAQYADA RAACSAN (ANNEXES).....16

1. Hordhac iyo Taariikh

Dadka nugul waxa ka mid ah, carruurta, hooyada uurka leh dadka waaweyn iyo naafada. Carruurtu waxay ka mid yihiin dadka nugul ee sida aadka ah ugu nugul dhibaatooyinka, xannuunada daryeel la'aanta caafimaadka iyo nafaqo xumada, carruurta yar yar intay ku jiraan waxbarashada waxay la kulmaan dhibaatooyin badan oo ay ka mid yihiin jidh dil; maagis; niyad jebin badan, dhiiri gelin la'aan garaadkooduna saameyn ku reebta, inta badana dhibaatadani waxay kaga dhacdaa goobaha waxabarashada siiba dugsiyada iyo malcaamadaha, mawduuceenan waxaan ku baadhi doona cadaalad darrada ay carruurtu la kulanto, waxana cilmi baadhistan laga sameeyay degmada Hargeysa.

Hooyooyinka uurka leh ma helaan xannaanayn ku filan wakhtiga ay uurka leeyihiin iyo markay ummulaanba, hooyada xaamilada ahi ma hesho daryeel waxayna qabataa shaqooyin badan oo aanay cidna ka caawin sida shaqooyinka qoyska maalin laha ah, mana haystaan goobo lagu xannaaneeyo, xarumo caafimaad oo u gaar ah iyo mid lagu daryeelo toona, taas oo u keenta marka dambe dhiig la'aan iyo nafaqo darro.

Dadka naafada ah bulshada qeyb ka ahi ma helaan daryeel u gaara,waxbarasho bilaasha iyo caafimaad toona, cusbitaaladuna ma laha, goobihii u gaarka ahaa ee ay ku kori la hayeen dadka waawayni , malaha goobo loogu talo galay in lagu caawiyo laguna xannaaneeyo, xaaladooda iyo hadba xaaladay ku jiraan, xeerka carruurta oo aan lagu dhaqmin laguna xukumin carruurta, waxana loo adeegsadaa xukunkooda xeerka ciqaabta guud, taaso khalad ku ah xuquuqdooda, xeerka adeega naafada oo aan lagu dhaqmin, iyadoo shareecada islaamku ilaalisay sheegtayna in mudnaan gaar ah la siiyo.

1.1. Ujeedka laga leeyahay xogtan

- Xogogaal u noqoshada xaalada dhabta ah ee carruurta Somaliland
  In la ogaado noocyada tacadiyada ka dhanka ah ee carruurta iyo goobaha ay ka dhacaan
  in la helo cadaalad bulsheed oo loo siman yahay meeshana ka saarta kala sareynta bulshada dhexdeeda, lagana gaadho guulo wax ku oola dhanka cadaalada, oo ay cadaato awooda ay leedahay cadaalada oo kor loo qaado, waxaa hore loo yidhi, "Cadaalada baa dadka wada deeqda".

2. Habka Cilmi-baarista

Waxa loo soo baadhayaa warbixintan iyadoo lala kulmaayo bulshada qeybaheeda kala duwan si koox koox iyo keli keli ah, iyadoo laga weydiinayo su'aalo la xidhiidha si loo helo xog dhameystiran oo warbixintan la xidhiidha. Dadka laga soo uruurinayo xogta waxa loo balan qaadi doona in la sugayo xogta ay bixin doonaan cidna aan lala wadaagi doonin .xogtana loo isticmaali doono, si loo helo xogta dhabta ah ee xaalada carruurta **Somaliland**. Waxa diiradda la saari doona degmooyinka, degmada Hargeysa ay ka koobantahay, waxana la sii xulan doona degmooyinka iyo xaafadaha carruurta danyarta ah ay degan yihiin si xaaladooda dhabta ah loo ogaado.

Si loo helo xog dheerada oo ku saabsan xaalada carruurta, waxaan xidhiidh la sameyn doonaa hay'adaha kala duwan sida maxkamada, saldhigyada booliska, iyo haay'adaha ka shaqeeya carruurta.

Bulshada ku nool magaalada Hargeysa waxa lagu qiyaasaa qiyaas dhan **750 000 [Toddoba boqol iyo konton kun oo ruux]** Waxaan qiyaas ahaan u qaadan doona inagoo isticmaalayna habka cilmi-baadhista **384** qof.

3. Natiijooyinka iyo Falanqaynta

Ka dib markii aanu daraasad ku sameynay xaalada dhabta ah ee ay ku sugan yihiin carruurta Somaliland waxa noo soo baxday natiijooynka aynu hoos ku sharaxi doono, shaxdan hoose waxa ay ina tusaysaa jinsiga iyo degmooyinka ka qeyb qaatay cilmi-baadhistan.
Si loo helo xog dhammaystiran kana turjumaysa xaqiiqada dhabta ah ee

JINSIGA KA QEYB QAATAYAASHA CILMI-BAADHISTA IYO DEGMOOYNKOODA

		JINSIGA		WADARTA
		Dhedig	Lab	
DEGMADA	Gacan Libaax	28	23	51
	26 June	18	21	39
	Koodbuur	31	30	61
	Axmed Dhagax	25	28	53
	Macalin Haaruun	43	24	67
	Maxamuud Haybe	62	51	113
WADARTA		207	177	384
BOQOLEY		54%	46%	100%

tacadiyada ka dhanka ah carruurta, waxa cilmi baadhis ku tacaluuqda arrintaas laga sameeyay lix degmo oo ku yaal magaalo madaxda Hargeysa, iyada oo tixgelin gaar ah la siinayo jinsiyada kala duwan si dhinac kasta loo darso xogta iyo waayo aragnimada ku lamaan, cilmi-baadhista la sameeyay, dadkii ka qeyb qaatay una badnaa dadka xaqiiqada og **53%**, waxay ahaayeen dhedig halka **47%** ay ahaayeen lab, taasi waxay ina tusaysaa in si isku dhaw luugu sinaa ka qeyb qaadashada xog bixinta.

DA'DA KA QEYB GALAYAASHA CILMI BADHISTA



Waxa xusid mudan in cilmi baadhistan ku saabsan tacadiyada ka dhanka ah xuquuqda carruurta, ay dadka ugu badan ee ka qeyb qaatay da'doodu u dhaxayso **40-60** jirka, oo ah dadka waaqiciga ah, sida dhawna ula socda xaalada carruurta tiradooduna **tahay (173)**, halka dadka ugu yar ee ka qeyb qaatay cilmi-baadhistan yihiin dadka da'doodu tahay **60 jirka (34)**, taaso ku tusaysa inay dadka waaweyni ku yar yihiin halka dadka da'doodu dhexdhexaadka tahay ku badan yihiin daraasadan ku saabsan carruurta iyo tacadiyada loo gaysto iyo qaababkay ugu dhacaan carruurta tacadiyadan ka dhanka ah xuquuqdooda aasaasiga, iyagoo ugu dhacaan qaabab kala duwan iyo meelo kala duwanba.

XOGTA GUURKA



Sidaas si la mid ah, waxa aan meesha ka madhnayn in intii daraasadani socotay kuna saabsan tacadiyada carruurta ay dadku ugu badan ka qeyb qaatay yihiin dadka xaaslayda ama xaasaska, kuwaas oo ah dadka inta badan xogta haya carruurtana gacanta ku haya kuwaas oo ah cadad dhan marka loo xisaabiyo boqolayda boqolkiiba **45%** taasoo micnaheedu yahay in dadka ugu badan ee ka qeyb qaatay yihiin xaaslayda halka dadka ugu yar ee ka qeyb qaatay yihiin dadka aan weli guursan ee aan xaaslay noqon oo ah dadka ku yar ka qeyb qaadashada daraasadan, marka loo xisaabiyo qaabka boqolayda, boqolkiiba **11%**.

DAKHLIGA QOYSKA





Markan dhinac iska taagno, cilmi-baadhistan ku saabsan tacadiyada ka dhanka ah carruurta xuquuqdooda, in dadka ugu badan ee ka qeyb qaatay intii cilmi-baadhistu socotay ayaa ah dadka shaqeeya ama dakhligu ka soo galo shaqo caadiya. **19%** waxay ka helaan nolol maalmeedkooda shaqo caadiya, halka sidaa si la mid ah ay dadkan darasaadan ka qeyb qaatay cadadkooduna yihiin **19%** kana helaan xawaalad oo ah mid lagu caawiyo cidday doontaba haka soo gashee. Waxa xusid mudan in dadkan oo ah kuwo shaqeysta iyo kuwo ku tiirsan lacagta xawaaladaha loogu soo diro ay isleeg yihiin ayna tiro isku mida ka yihiin dakhliga soo galaana u dhaxeeyo **($ 100-200)** iyo inka yar **($100)** halka dadka ugu yar ee daraasadan ka qeyb qaatay yihiin **15%** oo dakhliga soo galaan uu ka soo galo shaqo aan cadi ahayn oo ah **($200-300)**.

Waxan meesha ka maqneyn intii cilmi-baadhistani socotay in dadka ka kala socday degmooyinka kala duwan ee ka qeyb qaadanayay daraasadan markii la weydiiyay ma dhacaan tacadiyo ka dhan carruurta su'aasha waxa "Haa" kaga Jawaabay 53% halka "Maya" kaga jawaabeen 47%

MA DHACAAN TACADIYO KA DHAN AH CARUURTA



NOOCYADA TACADIYA KA DHANKA CARRUUURTA



Shaxada xaga sare inooga muuqata waxa uu ina tusayaa inoo iftiiminayaana sidan taaso aan ka ogaan karno inay dhacaan tacadiyo ka dhan ah carruurta waxyeelana xuquuqdooda aasaasiga ee ay leeyihiin, waxana ugu badan tacadiyada ku dhaca carruurta ee kala duwan dilmada ama garaacista sida ku cad jaantuuskan kor ka muuqda **(DILMO 178)** halka tacadiga ugu yar ee ku dhaca carruurta Somaliland yahay kufsiga **(KUFSI 70)** taaso macnaheedu yahay inay dilmadu ka badantahay kufsiga. Kufsiguna aad ugu yar yahay degmooyinka Hargeysa.

QAABKA LOO XALIYO TACADIYA KA DHANKA CARRUURTA



Haddii aan u jaleecno sida inooga muuqata cilmi-baadhistan ku salaysan tacadiyada loo gaysto; carruurta qaabka loo xaliyo marka dhibku ku dhaco carruurta ayaa ah in lagu xaliyo xeer dhaqameedka oo ah caado bulshada Somaliland leedahay siday xaqiijiyeen dadkii ka qeyb qaadanayay cilmi-baadhistan, waxana 'HAA' kaga jawaabay in xeer dhaqameedka lagu xaliyo oo ah sida jaantuskaan sare ka muuqata tiro dhan **(181)** halka qaabka ugu hooseeya ee tacadiyada ku dhaca carruurta lagu xaliyaa yahay shareecada islaamka sida ku cad jaantuska sare xaqiijiyeena tiro dhan **(36)** oo ah ka qeyb qaatayaashii cilmi-baadhistan xaqiiqo raadinta ah.

QODOBADA SAAMEEYA XAQUUQDA CARUURTA	JAWAAB	TIRADA	BOQOLEY
MA JIRAAN CARRUURO AY KU DHACEEN TACADIYO	Haa	199	52%
	Maya	174	45%
CARRUURTA AY KU DHACAAN TACADIYADU MA HELAAN DARYEEL CAAFIMAAD	Haa	129	34%
	Maya	251	65%
CARRUURTA AY KU DHACAAN TACADIYADU MA HELAAN CADAALAD	Haa	140	36%
	Maya	213	55%
MA JIRAAN MAXKAMADO U GAAR AH CARRUURTA	Haa	116	30%
MA JIRAAN BOOLIIS U GAAR AH CARRUURTA	Haa	146	38%
	Maya	229	60%
MA JIRAAN URURO U DHAQDHAQAAQA XUQUUQDA CARRUURTA	Haa	195	51%
	Maya	160	42%
MA JIRAAN XEERAR U GAAR AH CARRUURTA	Haa	276	72%
	Maya	104	27%

- Dadkii kala duwanaa ee ka kala socday degmooyinka magalada Hargeysa ka koobantay ee sida fiican uga qeyb qaatay cilmi-baadhistan xaqiiqo raadinta ah, laguna ogaanayo tacadiyada ku dhaca carruurta Somaliland ku nool, markii wax laga weydiinayay tacadiyada dhaca kuna dhaca carruurta Somaliland, markay ka jawaabayeen su'aasha ah carruurta tacadiyo ma loo gaysta waxa **HAA** kaga jawaabay **52%** halka **MAYA** ay kaga jawaabeen **45%**, markaas taasi waxay muujinaysaa inoona iftiiminaysaana inay jiraan tacadiyo loo gaysto carruurta Somaliland.

- Sidaa si la mid ah, dadkan ka qeyb qaadanayay daraasadan lagu ogaanayo tacadiyada carruurta marka wax laga weydiiyay carruurta tacadiyadu ku dhacaan ma helaan caafimaad waxa **HAA** kaga jawaabay boqolkiiba 34% halka ay **MAYA** kaga jawabeen boqolkiiba **65%** taasoo ina tusaysa inaanay carruurta tacadiyada loo gaystaa helin caafimaad iyo daryeel nololeed toona.

- Isla daraasadan, xubnihii ka qeyb qaadanayay ee ka kala socday degmooyinka kala duwan markay ka jawaabayeen carruurta tacadiyada loo geystaa ma helaan cadaalad waxa **HAA** kaga jawaabay boqolkiiba **36%** halka **MAYA** kaga jawaabeen boqolkiiba **55%**, taaso micnaheedu tahay ma helaan cadaalad iyo hiil cadaaladeed toona, waxanay u oomanyihiin cadalaad.

- Waxa sidaa si la mid ah, dadka daraasadkan ka qeyb qaadanayay ku jawaabeen markii la weydiiyay maxkamaddo u gaara ah ma jiraan, waxa **HAA** kaga jawaabay **30%** halka **65%** kaga jawabeen **MAYA** taaso daaha ka qaadaysa inaan maxkamaddo carruurta u gaar ahi aysan jirin iyo goobo lagu qaado dacwadahooda toona.

- Bulshadii kala duwanayd ee ka qeyb qaadanaysay cilmi-baadhistan, waxa markii ay ka jawaabeen boolis u gaara carruurtu ma jiraan waxa **HAA** ku jawaabay **38%** halka **MAYA** ay kaga jawaabeen **60%** taaso daboolka ka qaadaysa inaanay jirin boolis u gaara carruurta una tababaran soo qabashadooda iyo ilaalintooda.

- Isla cilmi-baadhistani intay socotay waxay ummaddii kala duwaneyd ee ka qeyb qaadatay marka wax laga weydiiyay ma jiraan urruro u dhaq-dhaqaaqa xuquuqda carruurta, waxa **MAYA** kaga jawaabay **42%** halka **HAA** ay kaga jawaabeen **51%** taasoo ina tusaysa inay jiraan urruro u dhaq-dhaqaaqa carruurta.

- Isla daraasadani, su'aalaheeda markey ka jawaabayeen xeer u gaara carruurta ma jiraa, waxa **HAA** kaga jawaabay **72%** inay jiraan xeerar u gaara caruurta halka **MAYA** kaga jawaabeen **27%** taasina waxay si fiican inuugu iftiiminaysaa inay carruurtu leedahay xeerar u gaara, balse aan lagu shaqeyn oo meel iska yaalo loona isticmaalo xeer aan ku haboonayn carruurta.

Sida uu ina tusayo jaantuuskan kor inooga muuqda waxa ka qeyb qaatayaashi daraasadani xaqiijiyeen kagana jawaabeen su'aashi la xidhiidhay isku waxbarasho ma helaan carruurta danyarta ah iyo caruurta dadka ladan ka soo jeeda, waxa **HAA** kaga jawaabay **40%** halka **MAYA** kaga jawaabeen **60%**, taasoo aan ka arkayno inay dadka kaga jawaabay maya badan yihiin kuna xaqiiqsanayno inaanay isku waxbarsho helin carruurta qoyska ladan ka soo jeeda iyo kuwa danyarta ka soo jeeda, farqi weyna u dhaxeeyo. Oo aanay helina wax isu dhigma haday tacliin tahay iyo hadday daryeel kale tahayba.

Sidee lagula dagaalami karaa ama lagu yareyn karaa tacadiyada ka dhanka ah carruurta?

Waa In la sameeyo wacyi gelin lagu wacyi gelinayo bulshada qeybaheeda kala duwan, ahmiyada ay leedahay ilaalinta xuquuqda carruurta si kor luugu qaado, koboca carruurta lana suuliyo tacadiyada carruurta loo gaysto, waa in la soo saaraa shuruuc culus oo lagu ilaalinayo xuquuqda carruurta, si ay carruurtu u hesho magangalyo buuxda kana magan gasho dhibka loo gaysto; in gacmaha lays qabsado oo la taageero wax u qabashada carruurta xeerka jirana lagu dhaqmo loona saameeyo maxkamaddo, boolis iyo goobo dhaqan celineed oo u gaara laguna baro xirfado kala duwan oo anfaca waxna ka tara noloshooda, horseedna u noqda isbedelka noloshooda iyo bulshadoodaba ah si ay dhigood wax ula qaybsadan kana qeyb qaatan horumarka bulshada dhexdeeda iyo wadankaba ka jira.

NATIIJADA XOG URUURINTA KOOX KOOXDA AH

Ma jiraan tacadiyo ka dhan ah carruurta oo ka dhaca deegaankiina?

Si xog dheerada aan u helno, waxanu soo waraysanay dadka u dhaq-dhaaqa xuquuqda craruurta ,ururada ka shaqeeya iyo dadka madax banaan, anagoo ka duulayna inaanu ogaano hubinana tacadiyada loo gaysto carruurta, waxay noo xaqiijiyeen in tacadiyada loo geysto carruurta ay yihiin qaar badan ayna kala duwan yihiin, kuna keenan xaalado nafsiyan saameeya, kuna abuura cabsi badan oo ka soo waajahda noloshooda oo ay kala kulmaan bulshada dhex deeda, siiba goobaha ay bulshadu ku kulanto ayna u sii dheer yihiin in dadku si xun ula dhaqmaan markay ka ag dhawaadan. Si aanu u sii hubino xogta ay na siiyeen waxanu kulamo la sameynay dadka xogaagalka u ah ee u dhuun daloola tacadiyada carruurta loo gaysto.

Tacadiyo Noocee ah ayaa lagu sameeyaa carruurta?

Sidaanu ku helnay xogtan noona xaqiijiyeen dadka ka shaqeeya xuquuqda carruurta , iyadoo ay jiraan tacadiyo kala duwan oo loo geysto carruurta, haddana waxa xusid mudan inay sii kala waaweyn yihiin oo ay kala duwan yihiin, waxaana ugu badan tacadiyada ku keena niyad jabka keenan inay nolosha ka dhacaan. Waxa kale oo aad ugu badan carruurta dilmada joogtada ah ee ay kala kulmaan goobaha waxbarashada iyo waalidiinta qaarkood oo xittaa ilmaha yari uu gaadho heer uu ku hadro marka uu hurdo habeenkii, sameeyana dhawaaq uu leeyahay(alla I daaya I daaya dhibkan iga dhaafa oo garaacista iga daaya). Waxa kale oo ka mida kufsiga lagulo kaco hablaha yar yar ee aan qaan gaadhin kuna abuura in inanta yari nolosheeda sii wadan kari waydo, iyadoo ay dhaawacyo soo gaadhaan, kuwaas oo qaarkood saameyn xoogan ku yeesha hab nololeedkeeda, sidaa si la mid ah, waxaa loo geystaa carruurta tacadiyo ay ka mid yihiin takoorid, maagis, ay kala kulmaan bulshada qeybaheeda kala duwan, sidaanu ogaanay intay socotay cilmi-baadhistu.

Goobaheebu kaga dhacaa carruurta tacadigu, waalidkuna door intee leeg buu ku leeyahay?

Siday noo xaqiijiyeen ururada ka shaqeeya carruurta iyo dadka u dhaq-dhaqaaqa xuquuqda carruurta, waxa jira in loogu geysto carruurta tacadiyo goobaha waxbarashada, garoomada ciyaaraha, suuqa, iyo guryahaba. Doorka uu ku leeyahay waalidku tacadiyada carruurta, waxa ka mid ah in waalidku carruurta inay ugu sidiiqaan xumaanta, caruurtooda ma daba galaan mana siiyaan wacyi gelin kor u qaadaysa akhlaaqdooda. Tusaale ahaan, aabuhu ma oga carruurtiisu waxay sameeyaan halka ay hooyaduna ku hawlan tahay shaqada guriga. Waalidku marka uu doonayo inuu ilmihiisa wax fahansiiyo waxa uu adeegsadaa inuu dilo, dilmadaa uu dilaana waxay ku keentaa inuu ilmuhu noqdo mid cabsi badan ku jirto oo dareema baqdin marka uu bulshada la hadlaayo ama uu noqdaba mid aan ka qeyb qaadan dhaqdhaaqa ay carruurtu sameeyaan, sida kubad ciyaarista iyo qeybaha kala duwan ee ciyaaraha.

ISKU WAXBARASHO MA HELAAN CARUURTA DANYARTA AH IYO CARUURTA DADKA LADAN



Ma jiraan tacadiyo carruurta ka dhan ah oo ka dhaca goobaha waxbarashada, door intee leeg bay ku leeyihiin macalimiintu?

Si aanu ugu kuur galno xaalada dhabta ee ka jirta goobaha waxbarashada ee kala duwan, waxaan xogo rasmiya ka helnay dad xogagaal u ah kuna dhaw goobaha waxbarashada ee tacadiyadu ka dhacaan, waxanu ogaanay intaanu ku jirnay baadhistayadan ,inaan macalimiintu u tababarneyn sida loola dhaqmo arday kala dabeecad iyo fahan duwan, isla markaana ay dhacdo eexasho ka timaada macalinka, sida kala jeclaysi ardayda dhexdeeda ah iyo inuu ardayda xarfaanta ah si gaara ula shaqeeyo dhiirina geliyo, aadna u ammaano marka uu fasalka ku jiro, inta kalena yidhaahdo saaqidiin baa tihiin, waxba baran maysaan waxa kale oo intaa u dheer garaacis ama dilmo ay la kulmaan markay laylisyada ka soo shaqeyn waayan, arrimahaas oo ay ugu wacan tahay waayo arag nimo la'aan dhanka maamulka iyo maareynta ardayda, iyagoo macaliminta qaarkood geysta tacadiyo ay ka mid yihiin faro xumayn dhanka hablaha yar yar ah siday noo xaqiijiyeen ka qeyb qaatayaashu.

Carruurta danyarta ahi ma heshaa xuquuqdooda asaasiga ah?

Sida ay noo iftiimisay baadhistayadani intii aanu ku guda jirnay waxa noo soo baxday inaanay carruurta danyarta ka soo jeeda helin xuquuqdooda asaasigaa siiba waxbarasho, caafimaad, hoyga,waxa kalaan ogaanay inay carruurtu u kala nasiib fiicantahay xaga dakhliga soo gala waalidkood, halka carruurta danyarta ka soo jeeda aanu soo gelin waalidkooda dhaqaale kaafiya oo ku filan wax-barashadooda, caafimaadkooda iyo waxyaalaha soo raaca ee loo yaqaano quutal daruuriga taasina ay ku keentay ilmaha inaanu helin waxyaabihii asaasiga ahaa ee dhiirigelin lahaa si uu uu nolosha hami fog uga yeesho.

Xeer noocee ah ayaa loo maraa xukunka carruurta, mase jiraan goobo u gaara carruurta sida booliska, maxkamado iyo goobo dhaqan celineed?

Intii aan ku gudo jirnay xaqiiqo raadinta ku waajahan tacadiyada ka dhanka ah carruurta Somaliland, waxan ku ogaanay inaan loo marin carruurta xeerka nidaamka garsoorka carruurta ee Somaliland, laguna dhaqmin marka carruurta la maxkamadaynayo loona raaco xeerka ciqaabta guud oo loo sameeyay dadka waaweyn meelna layska dhigay xeerkii carruurta u gaarka ahaa, intaas waxa raaca inaanu ku helnay baadhistayadan inaanay jirin goobo ugaara carruurta sida maxkamado, boolis ugaara iyo xarumo dhaqan celineed toona, sidaa darteed, lagu xidho carruurta xukun sugayaasha saldhigyada booliska ee dadka waaweyn loogu talo galay in lagu xidho, carruurta la xukumana la geeyo xabsiyada dadka waaweyn halkaas oo loogu gaysto tacadiyo kala duwan oo kaga yimaada dadka waaweyn ee ay la xidhan yihiin, taasoo aan waafaqsanayn baaqyada caalamiga ee ilaalinta xuquuqda carruurta, waxna u dhimaysa jiritaankooda iyo noloshoodaba.

Door intee leeg bay bulshadu ka qaadan kartaa bedqabka craruurta ee tacadiga ka madhan?

✓ In la dhaqan geliyo xeerka nidaamka garsoorka carruurta, laguna xukumo carruurta waxa uu xeerku jideeyay .

✓ Inay ku dhiiri geliyaan waalidiinta inay ubadkooda ka saxaan akhlaaqada baraana sida loola dhaqmo bulshada qeybaheeda kala duwan oo ay ku dhex noolyihiin.

✓ Inay isu taagaan bedqabka carruurta ee ka madhan tacadiga kana qeyb qaatan daryeelka carruurta

XOGTA URURADA BULSHADA EE KA SHAQEEYA ARRIMAHA CARRUURTAH

Si aanu xog dheerada u helno siina xaqiijino cilmi baadhistayadan anagoo ka duulayna inaanu helno cilmi-baadhis xaqiiqda ku salaysan, waxaan waraysi qoto dheer la yeelanay urrurada ka shaqeeya xuquuqda carruurta iyo rugaha booliska ee degmooyinka ay Hargeysi ka koobantahay, waxaan xusid mudan intaas aanu la kulaynaba inay noo xaqiijiyeen arimahan hoos ku xusan.

- In ay jiraan tacadiyo ka dhana ah xuquuqda carruurta, taaso ay kala kulmaan goobo kala duwan sida suuqa, dugsiyada iyo goobaha lagu ciyaaro
- Inaanay carruurtu helin xuquuqdooda aasaasiga oo ay leeyihiin
- Inay jirto qorshe la'aan dhanka dawlada ah, siiba daryeelka taasina sababtay in carruurtu noqoto xabag nuugayaal, budhcad dadka dhacda iyo tuug dadka xada, taasni sabab u noqotay inay carruurtu dhaxasho cawaaqib xumadan hadda ay ku jiraan
- Inaanay jirin goobo u gaara oo lagu hayo ama lagu dhaqan celiyo
- Inaanay jirin Boolis u tababaran soona qabta markay dhibta gaystaan

Waxa xusid mudnaa, intii aanu ku guda jirnay cilmi-baadhistan xaqiiqo raadintaa inaanu la xidhiidhnay Wasaaradda qoyska iyo arrimaha bulshada Somaliland, markaanu is nidhi xogtan wax ka weydiiyana waxay dhawr goor noo qabteen balamo, waxanay ka gaabsadeen inay nala wadagaan wax xoga oo ku saabsan kaalinta ay ka qaatan carruurta wadanka,

Dhacdo (Case 1)

Intii aan ku guda jiray cilmi-baadhistan ku saabsan tacadiyada carruurta Somaliland loo gaysto, waxaan la kulmay mid ka mid ah hooyooyinka danyarta ah ee ku nool magalada Hargeysa degmooyinkeeda mid ka mid ah , waxanay hooyadani illa wadaagtay mid ka mid ah dhacdooyinkii soo maray kuna saabsan qoyskeeda, sheekadana dhexmartay aniga iyo hooyadani waxay u dhacday sida soo socota:

"Saacadu markay ahayd abaarihii 9:30am subaxnimo, anigoo ku sugan mid ka mid ah degmooyinka magaalo madaxda Hargeysa, waxaan la kulmay hooyo lagu magacaabo Xaawa Jaamac Cali, hooyo xaawa waxay iiga warantay dhacdo xanuun badan ku reebtay nolosheeda.

Dhacdan ku dhacday ayaa ah in wiilkeeda goor habeenimo ah ay ku qabteen ciidanka boolisku xaafadooda agteeda kuna xidheen mid ka mid ah saldhigyada magalada Hageysa, waxanay hooyo Xaawa tidhi "Wiilkayga da'diisu waxa weeyaan 13 jir markii uu xidhnaa 3 cisho ayaa maxkamada la keenay maxkamadina waxay ku xukuntay 3 sanno iyo lix bilood, markii xabsiga weyn loo gudbiyay waxa lala xidhay dad waaweyn, waxanay ku bilaabeen inay cuntada ka qaadan kuna sameeyaan jidh dil, kuna amraan in wixii loo keeno uu iyaga siiyo, intaa waxa u dheera inay bareen tuugnimo iyagoo uga sheekayn jiray inuu wax la soo xado lana shaqeeyo marka ay debeda u baxaan oo ay noqdaan koox wada shaqaysata. Inankii markii uu soo baxay waxa uu bilaabay inuu dadka xado taasna waxa sabab u ahaa xabsigii lagu xidhay oo ugu tagay tuug bartay dhaqankii tuugnimo ee ay ku jireen.

Hooyo Xaawa waxay intaas raacisay, in carruurta **Somaliland** ee lagu xidho xabsiyada dadka waaweyn ay xabsiyada ka soo baxaan iyagoo dhaqankii ka xumaaday oo soo bartay anshax xumo aanay hore u aqoonin.

Fiiro gaar ah:

Sidaan kaga boganayno dhacdadan ku dhacday hooyadan canugeeda, kuna sababtay inuu galo nolosha mugdigaa waxa kow ka ah in lagu xidhay xabsi aan loogu talo gelin in lagu xidho carruurta balse loogu tallo galay dadka waaweyn in lagu xidho.

Waxa iyana xusid mudan, in wiilkani uu ahaa wiil aan qaan gaadh aheyn loona marin xukunkiisa xeerka nidamka garsoorka carruurta, garsoorahuna u cuskaday xukunkiisa xeerka ciqaabta guud oo aan luugu talo gelin carruurta in lagu xukumo, taaso ina tusaysa in carruurta Somaliland loo la dhaqmo sida dadka waaweyn hoosna aan loo eegin xuquuqdooda iyo waajibaadka ay lahaayeen laguna dhaqayn xeerkoodi u gaarka ahaa.

Dhacdo (Case 2)

Canab Jaamac Nuur waa mid ka mida hablaha da' yartaa ee ku nool magaalada Hargeys, waxanay ka soo jeeda qoys dan yar ah. Canab da'deedu waa 14 sanno jir, waxay ahaan jirtay ardayad dhigata dugsi iyo malcaamad, balse hadda ma aha ardayad. Duruufo dhacay awgood ayay Canab u joojisay waxbarashadeedi iyo geedi socod kii wa barasho. Canab markaan la kulanay waxna ka weydiinay dhacdadan nolosheeda soo martay raadna ku yeelatay nolosheeda sababtayna inay ka hadho waxbarashadii iyo iftiinkii ugu muuqday wax-barashada, way nala wadaagi kari weyday, waayo markay is tidhaahdo hadal ilmo ayaa ka qubanaysay. Sidaa daraadeed, ayaa waxa xogteeda nala wadaagtay habaryarteed Indha deeq oo ah qofka hadda Canab gacanta ku haya ee ay la nooshahay wakhti xaadirkan, waxanay habaryarteed ku bilowday sheekada sidan:

"Canab waxay dhigan jirtay dugsi iyo madarasad, waxayna aheyd ardayad fiican oo jecel wax-barashada kuna dadaasha waxbarashadeeda, waxase ku dhacay tacadi uu u gaystay mid ka mid ah macalimiinteeda isagoo Canab ku qanciyay inay gelinka dambe u timaado si uu cashadrada ugu celiyo una fahansiiyo meelaha ku adag, laakiin macalinkii waxa uu ulla dhaqmay si fool xun isagoo u gaystay faro xumayn iyo hagar daamooyin xun. Canab way qarisay cidna umay sheegn waxa ku dhacay iyada.

Balse markii la ogaaday dhibta, Canab waxay sheegtay in qofka dhibkan u gaystay yahay macalinkeeda, markii arrintii sidaa u dhacday, waxa isu yimi odayaal ka kala socda labada dhinac waxayna odayaashi ku hashiiyeen in arrinka lagu dhameeyo geedka laguna xaliyo xeer dhaqameed ay ku heshiiyeen labadii dhinac.
Canab lama eegin caafimaadkeeda iyo nolosheeda toona, waxana xal gaadhay dad aan dhibka Canab dareemeyn. Hadda, Canab waxba ma dhigato waxayna iska joogtaa guriga oo way ka goday asxaabteedi waayo waxay ka baqaysaa inay faquuqaan markay u tagto" Sidaa waxa tidhi Canab habaryarteed indha deeq.

Waxay ina tusaysaa dhacdadan xanuunka badan ee ku dhacday Canab, inay tahay dhacdo fool xun baabi'isayna mustaqbalkeedii ay nolosha ka laheyd, waxaan ka ogaan karnaa inay jiraan tacadiyo noocan oo kale ah oo loo gaysto hablaha yar yar ee aan qaan gaadhka aheyn.

Waxa xusid mudan, inay tacadiyo noocani ku dhacaan hablaha yar yar ee aan qaan gaadhka ahayn, iyadoo uu dhibkaasi saameyn xoogan ku yeesho noloshooda iyaga oo aan helin daryeel sharci iyo mid caafimaad toona, taas oo sabab u noqotay inay ku jiraan noloshan go'doonka ah ee ay hadda Canab ku jirto oo kale, waxana sabab u ah xeer dhaqameedka dadku isticmaalayaan, iyadoon waxba la weydiinayn qofkii dhibtu ku dhacday, waxana qofkii dhibanaha ahaa arrimihisa go'aan ka gaadhaya odayaal.

Shaxdaan hoos ka muuqata waxa uu ina tusinayaa xaqa ilmaha iyo masuuliyada saaran waana si waafaqsan baaqyada caalamigaa ee carruurta.

	XAQA ILMAHA	MASUULIYADIISA
1	Inuu waxbarasho helo	Inuu macalimiinta ixtiraamo si fiican wax u barto
2	Inuu helo caafimaad	Inuu caafimaadkiisa ilaaliyo
3	In la jeclaado	Isna muujiyo jacayl
4	Inuu cunto helo	Inaanu daadin cuntada si fiicana u qaato
5	In la ilaaliyo ilmaha baahida gaarka ah leh	Inuu isna is ilaaliyo inta tabartiisa ah
6	In la ilaaliyo	Inuu isna is ilaaliyo
7	Inuu hoy helo	Isna si fiican u isticmaalo

4. Gunaanad iyo Talooyin

Gebo- gebo

- Maadama aan ogaanay inay jiraan tacadiyo ka dhan ah carruurta Somaliland, kuna keenaan xaalado kala duwan oo aan u wacnayn caafimaadkooda iyo noloshooda, toona isla markaan halis ku ah jiritaankooda iyo wanaaga noloshoodaba kana mid yihiin kuwan soo socda

- Dilmo ay kala kulmaan goobaha waxbarashada, goobaha ciyaaraha, suuqa iyo guryaha ay ku noolyihiinba oo ay kala kulmaan waalidka isagoo waalidku saameeya u kala eexasho inamada iyo hablaha sida waxbarashada, abaalmarinta, waxa u iibinta, taaso ah kala hormarinta ubadka oo aan fiicneyn.

- Takoorid ama yasid ay kala kulmaan carruurtu bulshada qaybaheeda kala duwan siiba dadka waaweyn, markay isyidhaahdaan la fadhiista oo la kiciyo laguna yidhaahdo kac kac laguuma ogola inaad la fadhiisato dadka waaweyne.

- Kufsi lagulo kaco hablaha yar yar ee aan qaan gaadhin, isla markaan aan helin cadaalada ay kaga soo kaban karto dhaawaca loo gaystay nolosheeda iyo jidhkeedaba iyo inaanay helin qorshe cusub oo ay nolosha ku sii wadan karto.

- Inaanay jirin maxkamaddo, boolis, iyo goobo dhaqan celineed oo u gaara carruurta si xuquuqdooda loo ilaaliyo.

- Inaanay maxkamadaha Somaliland ku shaqdyn xeerka nidaamka garsoorka carruurta oo uu meel iska yaalo.

- Inaanay jirin daryeel dheerada oo ay hesho carruurta somaliland, iyagoo aan ka helin daryeel fiican dawlada.

- Guurka deg dega iyo guurka khasabka ee lagula kaco hablaha yar yar ee aan qaangaadhka aheyn una gaystaan waalidku iyagoo aan eegeyn rabitaankeeda iyo da'deedaba.

Soo jeedin.

Maadaama aan xaqiiqsanay inay jiraan tacadiyo loo gaysto carruurta **Somaliland**, waxa wax looga qaban karaa sidan soo socota:

- Wacyigelin la siiyo bulshada qeybaheeda kala duwan, lana tuso mudnaanta ubadka yar yar ee ka soo jeeda danyarta iyo kuwa kaleba u leeyihiin wadanka iyo horumarkiisaba.

- In laga shaqaysiiyo xeerka nidamka garsoorka carruurta, kuna shaqeeyaan maxkamadahu laguna dabo galo oo la hubiyo iyado la eegayo in garsoorahu u cuskanayo ciqaabtooda.

- In la sameeyo maxkamado, boolis iyo goobo dhaqan celineed oo u gaara carururta laguna baro xirfado kala duwan oo anfacaya noloshooda.

- In dabagal lagu sameeyo, goobaha ay carruurta kaga dhacaan tacadiyadu siiba idugsiyada loona furo macalimiinta tababaro kor loogu qaadayo aqoontooda la dhaqanka ee carruurta iyo sida ugu haboon ee ay wax u fahansiin karaan ilmaha.

- In waalidka lagu tababaro habka ugu fiican ee barbaarinta tacadiga ka madhan si ilmo dhisani ugu soo baxo bulshada iyo wadanka.

5. Lifaaqyada raacsan (Annexes)

Lifaaqa A: Su'aalaha Daraasadda

FOOMKA XOG URRUURINTA

HORDHAC

Magacaygu waa .....
Anigoo ah baadhe madax banaan waxan urruurinayaa xog ku saabsan tacadiyada loo gayisto caruurta, waxan rabaa inaan si fiican u fahmo waxayaabaha sababa tacadiyada loo gaysto carruurta. Xogta aad I siiso waxaan u keydin doona si qarsoodiya ah, cidna lalama wadaagi doono.

Fadlan maysiin kartaa 30 daqiiqo oo aan kugu waraysto?

B. MACLUMAADKA FOOMKA		
B1	**Tirada xog urrurinta**	
B2	**Magaca xog urruuriyaha**	
B3	**Magaca degmada**	
B4	**Maalinta waraysiga**	
T. ASTAAMAHA QOYSKA		
T1	Madaxa qoyska	1 dhidig 2 lab
T2	Da'da madaxa qoyska	15-25 iir 26-40 jir 40-60 jir Ka weyn 60 jir
T3	Xogta guurka ee madaxa qoyska	B Xaas T Carmal X Keli J Laga dhintay
J. HEERKA NOLOSHA QOYSKA		
J1	Sannadkii u dambeeyay xaguu dhaqaalahu ka soo gelay qoyska Dooro inta ku haboon	B- Ganacsi yar yar T-Shaqo aan caadi ahayn J- Shaqo caadiya X- Xawaalad Kh- Wax kale fadlan noo sheeg
J2	Sannadkii la dhaafay muxuu kharashku kaga baxay qoyska?	B- Cunto iyo biyo T- Caafimad J- Waxbarasho X- Hu' Kh- Wax kale fadlan noo sheeg
J3	Waa maxay celcelis ahaan dakhliga soo gala qoyska bishii?	B- Ka yar $ 100 T- U dhaxaysa $100-$200 $200-$300 J- Ka badan $300

X. ILAALINTA CARUURTA		
X1	Ma ka dhacaan tacadiyo ka dhana carruurta degmadiina?	B- Haa T- Maya
X2	Haday jawaabtu tahay haa, waa noocma tacadiyada ku dhaca carruurta degmadiina?	B- Dil mo T- Kufsi J- Takoorid X- Kuwo kale
X3	Sidee baa lagu xaliyaa tacadiyada ka dhanka ah carruurta?	B- Maxa,kamada T- Booliska J - Xeer –dhaqameed X - Shareecada islaamka Kh- Kuwo kale
X4	Ma jiraan carruuro ay ku dhaceen tacadiyada aad soo sheegtay?	B- Haa T- Maya
X5	Carruuraha ay tacadiyadu ku dhacaan ma helaan daryeel caafimada?	B- Haa T- May a
X6	Carruuraha ay tacadiyadu ku dhacaan ma helaan cadaalad?	B- Haa T- Maya
X7	Ma jiraan maxakamado u gaar carruurta?	B- Haa T- Maya
X8	Ma jiraan boolis u gaara carruurta?	B- Haa T- Maya
X9	Ma jiraan urruro u dhaq-dhaqaaqa xuquuqda carruurta? Hadday jiraan waa kuwee urruradaasi?	B- Haa T- Maya
X10	Waa maxay sababta caruurta ay tacadiyadu ku dhacaan aanay cadaalad u helin?	B- Aqoon la'aan T- Ma jiraan boolis u tababarani J - Malaha maxakamad ugaara X- Ma jiraan goobo ugaara lugu hayo Kh- DHaqaale la,aan
X11	Ma jiraa xeer u gaara carruurta?	B- Haa T- Maya
X12	Isku waxbarasho ma helaan carruurta ka soo jeeda qoysaska dan yartaa iyo kuwa aan ka soo jeedin? Hadday jawaabtu tahay maya, waa maxay sababtu?	B- Haa T- Maya
X13	Sidee lagula dagaalami karaa ama lagu yareyn karaa tacadiyada ka dhanka ah carruurta?	

Cabdillaahi Maxamed Warsame (Abdillahi Mohamed Warsame) waa shaqaale samafal ah iyo saynisyahano cilmi baaris oo xarunteedu tahay magaalada Hargeysa, Somaliland. Waxa uu hayaa M.Sc. ee Ilaalinta Dhirta (Entomology) iyo B.Sc. ee Beeraha ee Ilaalinta Dhirta ee Jaamacadda Suudaan ee Sayniska iyo Teknolojiyadda.

Tirsiga 2
Juulaay 2020

DADKA NUGUL, GAAR AHAAN CARRUURTA

Cabdillaahi Maxamed Warsame

EXPANDING ACCESS TO JUSTICE

Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada
Taxanaha Daraasadda Aqoonyahannada EAJ

USAID KA TIMID DADWAYNAHA MARAYKANKA
BALAADHINTA ADEEGYADA MARIN-UHELIDA CADAALADA
pact building local promise.
ABA AMERICAN BAR ASSOCIATION Rule of Law Initiative